# Fahmitaanka Khidmadaha Adeegyadaada ee 2024/2025

Dhamaadka Febraayo, waxaanu kuu soo diri doonaa warqad si aanu kuu ogeysiino kharashka adeegaaga cusub ee sanadka soo socda. Kharashkaagu wuxuu ku salaysan yahay qiyaastayada ugu fiican ee kharashyada sanadka oo waraaqahaaga waxaa ku jiri doona kala qeybinta kharashkaaga adeeg kasta oo aan bixino.

Waxaan rabnaa inaan si isku mid ah aan kuugu soo dalacno khidmadaha adeegyada, laakiin marka qiimaha alaabooyinka iyo shaqada ay kordhaan, midani waxay si dabiici ah u kordhisaa qiimaha adeegyada aan bixino. Waxaa jira war wanaagsan oo ku saabsan qiimaha tamarta in kasta oo qiimaha jumlada uu hoos u dhacay ilaa sanadkii hore.

Kahor intaadan helin khidmadaada cusub ee Febraayo, waxaan u maleynay inay faa'iido leedahay inaad eegto qaar kamid ah isbedelada saameeya khidmadahaaga 2024/2025. Waa muhiim in la xasuusto in mid kasta oo kamid ah qeybahan ay yeelan doonaan saameyn kala duwan oo ku xiran goobta aad ku nooshahay iyo adeegyada aad hesho.

## Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

### Maxaa kharashka adeegayga kujira waxyaabaha lagu helayo?

Iyadoo ku xiran nooca guriga aad ku nooshahay, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad bixiso khidmada adeega.

Khidmadaha adeegu waa lacag-bixino aad adigu bixiso si aad u bixiso kharashyada bixinta adeegyada la wadaago ee goobta aad ku nooshahay.

Haddii aad kireysato gurigaaga, khidmadda adeega waxaa kamid ah kharashyada sida:

- dayactirka dhulka
- nadiifinta goobaha la wadaago
- nadiifinta daaqadaha ala wadaago
- dayactirka wiishashka, nidaamyada albaabka laga soo galo, hababka digniinta dabka, iyo nalka degdega ah
- khidmadaha korontada, gaaska, iyo biyaha ee la wadaago
- adeegyada kale ee lagu qori doono liistada qiyaasta kharashka adeega.

Xaaladaha qaarkood, waxaa sidoo kale jiri kara kharashyada shaqaalaha, sida maamulaha guriga.

Liiska buuxa ee adeegyada aad hesho waxaa lagu dari doonaa macluumaadka aanu kuu soo dirno sanad kasta.

Haddii aad tahay mulkiilaha guriga, waxaa kale oo aad bixin doontaa kharashka dayactirka maalinlaha ah ee dhismaha iyo goobaha la wadaago.

## Waa maxay khidmadaha adeega ee isbadbedala?

Bilowga sanad maaliyadeed kasta, waxaan dejineynaa miisaaniyad, taas oo ah qiyaastayada kharashyada suurtagalka ah ee aan u baahanahay inaan ka helno adeegyada aan bixinno.

Dhamaadka sanad maaliyadeedka, waxaanu dib u eegis ku samaynaa kharashaadka dhabta ah ee ka dhanka ah miisaaniyada waxaana ku siinaynaa bayaan sanadeedka. Midan badanaa waxaa la soo saaraa dhammaadka Sebteembar sannad kasta.

Lacag bixin kasta oo hoosaysa, oo loo yaqaan khasaare, ayaa lagu dalaci koontadaada. Lacag bixin kasta oo dheeraad ah, oo loo yaqaano lacag dheeraad ah, ayaa lagu shubaa koontadaada.

Waxaad xaq u leedahay in aad ka doodo qiimaha khidmada adeega ee isbadela iyada oo ku salaysan inaad u malaynayso in kharashku macquul yahay, ama u dhigmin tayada adeega aad heshay. Macluumaad ku saabsan sida midan loo sameeyo waxaa lagu soo daray warqadaada ogeysiinta.

## Waa maxay khidmadaha adeega ee go'an?

Bilowga sanad maaliyadeed kasta, waxaan dejineynaa miisaaniyad, taas oo ah qiyaastayada kharashyada suurtagalka ah ee aan u baahanahay inaan ka helno adeegyada aan bixinno.

Dhamaadka sannad kasta haddii lacagta dhabta ah ee aan ku bixinay bixinta adeegyada ay ka badan tahay qiyaastayada, waxaan masuul ka noqon doonaa kala duwanaashaha u dhexeeya. Laguma waydiin doono inaad bixiso lacag dheeraad ah. Haddii aan kharash gareynay wax ka yar qiyaastayada, maadaama kharashka la go'aamiyay ma heli doontid lacag celin. Kuma siinayno warbixin dhamaadka sanadka maadaama kharashku go'an yahay.

## Sidee ayaan ku ogaanayaa inaan bixiyo khidmada adeega ee go'an ama mida doorsoonta?

Haddii aad tahay mulkiilaha guri, waxaad bixin doontaa khidmada adeeg ee doorsoonta, midan waxaa ku jira haddii aad ku iibsatay qayb kamid ah gurigaaga lahaanshaha la wadaago. Bixinta khidmada doorsoonta waxay ku jirtaa shuruudaha heshiiskaaga kiraysiga ama heshiiska wareejinta waxayna dejin doontaa aasaaska khidmada aan kugu soo dalacno.

Haddii aad kireyso gurigaaga, waxaad bixin kartaa khidmad go'an ama khidmad doorsoonta. Caadiyan, inta aad ku nooshahay gurigaaga, waxay u badan tahay inaad bixiso khidmad doorsoonta. Dhamaan kiraystayaasha cusub ee laga bilaabo 2017 waxay bixinayaan khidmad go'an.

Waraaqaha aanu kuu soo dirno ayaa si cad u muujin doona in khidmadaadu tahay mid go'an ama mid doorsoonta.

## Sidee ayaan kugu qiyaasna khidmahaaga?

Waxaan isticmaalnaa isku darka kharashyada qandaraaska la og yahay, tusaale ahaan qandaraasyada nadiifinta iyo dayactirka dhulka, iyo kharashyadii hore ee adeegyada mitir ahaan loo cabiro sida korontada. Qandaraasyada qaar ayaa lala xiriirin doonaa sicir bararka sida tafaariiqda iyo tusmooyinka qiimaha macaamiisha si aan horay ugu ogaanno inta qiimaheedu kor u kici doono.

Adeegyada qaarkood waxaan u baahanahay inaan qiyaasno adeegyada loo baahan doono sanadka gudihiisa. Tusaale ahaan, qaaditaanka qashinka sababtoo ah kor u kaca wasakhda ama waxyeelada geedaha ay sababaan duufaanada. Kharashyadan waxaa inta badan naloogu soo dalaci si ku salaysan xalalka ay isticmaalaan qandaraaslayaashayadu waana kala duwan yihiin sanad kasta. Waxaan isku daynaa intii karaankeena ah inaan ku soo dalacno qiyaas macquul ah kuwaas oo ku saleysan aqoontayada halka aad ku nooshahay.

## Waa maxay sababta khidmadaha adeegayga ay u sareeyaan?

Qiimaha aan ku bixino adeegyada aad ayuu u kordhay sanadihii ugu dambeeyay sababtoo ah silsilada sahayda oo dhaaftay kharashyo badan iyo kororka qiimaha gaaska iyo korontada. Kuwani waa kuwo ka baxsan xakamayntayada, waxaana u baahanahay inaan kharashaadkan kuugu soo gudbino kharashka aanu kugu soo dalacayno. Wax kale kuma darno midan aan ka ahayn dib ugu dalicitaanka kharashaadka maaraynta adeegyadan mana ka faa'iidaysano khidmadaha adeegga ee kaliya waxa ku soo dallaca waxa ay noogu kacayso.

Waxaan ognahay in qiimaha noloshu uu u sarreeyo qof kasta, waxaana halkaan u joognaa inaan ku caawino haddii aad u baahan tahay. Kooxdayada Joogtada Kiraystaha ayaa ku siin karta caawimo iyo talo haddii aad dhaqaale ahaan la dhibtooto. Waxaad ka heli kartaa wax badan oo aad kala xiriiri halkan.

www.pahousing.co.uk/heretohelp

## Waa maxay sababta khidmadaha adeegayga ay uga duwan yihiin kuwa xaafada dariskayga ah?

Caadi ahaan, waxaad bixinaysaa qayb kamid ah wax kasta oo aad ku nooshahay xitaa haddii aadan shakhsi ahaan u isticmaalin adeegyada qaarkood. Tusaale ahaan, waxaad bixinaysaa dayactirka wiishka xitaa haddii aadan weligaa wiishka isticmaalin dhismahaaga ama aad ku nooshahay dabaqa dhulka ah.

Waxaa jiri kara wakhtiyo uu heshiiskaaga kireysiga ama heshiiska kireysigu sheegayo in lagaa rabo inaad bixiso lacag ka duwan.

## Sidee ayaad iigu soo dalacdaan khidmada tamarta ee halka aan ku noolahay?

Iyadoo ku xiran goobta aad ku nooshahay waxaa laga yaabaa in lagugu soo dalaco kharashka tamarta  wadaago  iyo kulaylka shakhsi ahaaneed ama biyaha kulul ee gurigaaga, ama labadaba.

Kharashyada la wadaago waxaa kamid ah kharashyada nalka, kulaylka iyo bixinta korantada wiishashka, habka albaabka laga soo galo iyo alaarmiga dabka iyo qalabka kale. Waxaan kusoo dalacnaa midan iyadoo ku saleysan halbeegga isticmaalka, oo loo yaqaan saacadaha kilowatt, iyo qiyaasta isticmaalka sanad walba, oo ay la socoto qiimaha halbeegga aan bixinno iyo kharash kasta oo taagan.

Haddii aan ku siino kulayliyaha iyo biyaha kulul adiga oo isticmaalaya kulaylka, mar labaad waxaanu xisaabineynaa kharashka guud ee ku salaysan isticmaalka iyo qiimaha cabirka mitirkii. Iyadoo ku xiran nooca kulayliyaha ee guriga aad ku nooshahay waxay la macno tahay inaad bixiso tamarta aad shakhsi ahaan u isticmaasho haddii mitir hoose lagu rakibo, ama waxaad bixin kartaa qayb kamid ah kharashka guud. Nasiib daro, dhisme kasta kuma haboona ku xiritaanka mashiinta xisaabisa mitirka, tanina waxay la macno tahay in saamiga aad bixiso laga yaabo inaysan ka tarjumayn tamarta aad dhab ahaantii isticmaasho. Waan ognahay in midani aysan mar kasta u muuqan mid cadaalad ah.

Iyada oo qiimaha tamarta uu kordhay xagaaga 2022, waxaan awoodnay inaan ka helno qiimo-dhimis dowlada. Anagoo kuwan helnay, waxaa waajib nagu ah inaan kuwan kuu fidino isticmaaleha ugu dambeeya ahaan. Tani waxay noqon doontaa xaalada marka qiimaha aanu bixinay, oo ay ku jirto qiimo-dhimis, uu ka hooseeyo khidmadahaaga. Haddii ay midani ku saameyso, mar hore ayaan qoraal kuugu soo diri doonaa.

### Sideen ku ogaan karaa waxyaabha kamidka ah ciwaanka bayaankayga khidmadda adeega?

Waxaad ka heli kartaa sharaxaada khidmadaha weybsaytkayaga.

### Maxaa lagu daray khidmadayda maamul ahaaneed?

Khidmadan waxay daboolaysaa kharashka shaqaalaheena si ay u maamulaan qandaraaslayaasha aan isticmaalno iyo hawlaha kale ee maamulka ee maalinlaha ah.

Waxaa kamid ah kormeeritaanka qandaraasleydayada si loo hubiyo inay u shaqeynayaan heerarkii aan dejinay oo ay u tagayaan dhismooyinka sidii lagu heshiiyey. Waxaa kale oo ka mid ah hawlaha maamulka sida bixinta lacagta iyo hubinta waxyaabaha kale sida hubinta inay haystaan caymis sax ah.

Khidmada waxaa kaloo kujira kharashaadka wax ka qabashada su'aalahaaga guud, kharashyada kooxahayaga kuwaas oo soo saara miisaaniyada kharashka adeegga sannad kasta, la socoshada kharashyada, soo saarida qoraallada dhammaadka sanadka marka loo baahdo iyo in la hubiyo in dhammaan dakhliga lagaa qaado si sax ah loo qoondeeyey oo loo isticmaalo si waafaqsan bixinta adeegyada. Kharashyada kale ee kujira waxaa kamid ah bixinta adeegyada tiknoolajiyada, shaqaalaha iyo adeegyada sharciga ee la xiriira khidmadaha adeega.

Haddii uu jiro wakiil maamul oo isticmaala qandaraaslayaal u gaar ah, waxaa laga yaabaa inay sidoo kale soo dalacaan khidmad maarayn marka lagu daro khidmaddayada.

## Waa maxay guryaha leh adeeg isku mid ah, xaafad weyn, iyo guri shakhsi ahaaneed?

Guryaha leh adeeg isku mid ah waa koox guryo ah oo wadaaga adeegyo isku mid ah. Magaca guryahaaga leh adeeg isku mid ah waxaa lagu bixin doonaa goobta ugu sareysa qiyaasta kharashka adeegga.

Xaafad waa goobo deegaan oo la wadaago oo ay ku dhex yaalaan guryaha isku adeega ah, waxaana ku jira dhulalka aan dayactirno oo ay ku jiraan baarkinnada baabuurta, meelaha lagu ciyaaro iyo meelaha kale ee banaanka ah.

Guri waa dhismaha aad ku nooshahay, caadi ahaana waa dabaqyo. Guriga wuxuu ka koobnaan karaa tiro kasta oo guryo gaar ah waxaana laga yaabaa in ay jiraan tiro guryo ah oo ku jira guryaha isku adeega ah.

## Sidee ayaan u bixiyaa khidmada adeegayga?

Haddii aan kugu soo dalacno khidmad adeeg oo dheeraad ah kiradaada, midan waxaa lagu tusi doonaa waraaqaha aanu kuu soo dirno. Waxaad u baahan doontaa inaad bixiso wadarta oo dhan.

Haddii aad ku bixiso lacag ku bixin kaarka oo toos ah, waxaanu si toos ah ugu beddeli doonaa lacagtaada tooska ah qadarka cusub.

Haddii aad qaadato dheefo, waa muhiim inaad u sheegto bixiyaha kaalmada lacagta cusub ee la bixinayo. Inta badan waanu ogaysiin doonaa iyaga oo ku matalaya, laakiin markasta way kuu fiican tahay inaad sidoo kale samayso.

Ma aha dhamaan khidmadaha adeegu inay u qalmaan dheefaha. Waanu ku ogaysiin doonaa qadarka kharash kasta ee aan u qalmin waraaqahaaga, kuwaas oo inta badan ay ku jiraan biyaha, gaaska iyo korontada si toos ah gurigaaga laguugu keeno.

## Yaa maamulaya adeegyada la bixiyo?

Waxaan leenahay kooxo dhowr ah oo midba midka kale kala shaqeeya maareynta adeega la bixiyo.

Kooxda Guryahayga ayaa maareeyaan qandaraaslayaashayada iyo asxaabta gudaha ee ka shaqeeya dayactirka iyo nadiifinta dhulka aad ku nooshahay. Waxay hubiyaan in qandaraaslayaashu ay bixinayaan adeegyada ay tahay inay sameeyaan kormeer joogto ah.

Isku-duwayaasha Xaafadaha deriskayaga ah ayaa inta badan ka shaqeeya waxayna awoodi doonaan inay ka jawaabaan su'aalaha ku saabsan kharashka adeegga. Waxay sidoo kale hubiyaan in adeegyada lagu bixiyo ay yihiin kuwo buuxiya filashadaada waxayna la xiriiri doonaan kooxahayaga kale ee gudaha haddii ay dhibaato jirto.

Kooxda Kharashka Adeega waxay daggan tahay xafisyadayada waxayna mas'uul ka tahay dejinta qiyaasaha kharashka adeega bilawga sanadka, la socodka kharashaadka iyo diyaarinta warbixinta dhamaadka sanadka haddii aad bixiso khidmada doorsoonta. Waxay diyaar u yihiin inay ka jawaabaan wixii su'aalo farsamo ah ee la xiriira khidmadahaaga.

## Maxaan sameeyaa haddii aan dareemo in la igu soo dalacay khidmada adeeg aanan helin, ama adeegu uusan ahayn sidii la filayay?

Waxaan ognahay inaanan had iyo jeer wax saxin oo aan ka xunnahay haddii mararka qaarkood aad dareento hoos u dhaca adeegyadeena.

Haddii aad walaac ka qabto tayada adeega lagu siinayo Kooxdayada Guryaha iyo Isku-duwayaasha Xaafadda ayaa awood u yeelan doona inay midan saxaan.

Haddii aad dareento in lagugu soo dalacay shay ay tahay inaan lagugu soo dallacin markaas Iskuduwaha Xaafadaada ayaa awood u yeelan doona inuu kaala hadlo arintan si uu u hubiyo in wax walba ay yihiin sidii la rabay. Haddii aan ogaano inuu khalad ku jiro khidmadaada Kooxdayada Khidmadaha Adeega ayaa midan sixi doonta sida ugu dhakhsaha badan.

## Sidee ayaan u samayn doonaa cabasho rasmi ah oo ku saabsan khidmadaha?

Waxaan jeclaan lahayn in nala siiyo fursad aan wax ku saxno laakiin haddii aadan weli ku faraxsanayn waxaad ka heli kartaa halkan faahfaahin ku saabsan sida loo sameeyo cabasho.

www.pahousing.co.uk/complaints

## Yaan kala xiriiraa PA haddii aan qabo su'aalo ku saabsan khidmadaha adeegayga?

Marka ugu horeysa, fadlan nagala soo xiriir 0300 123 2221 ama iimayl noo soo dir. Waxaan hubinaynaa in su'aashaada loo gudbiyo kooxda saxda ah.